



Qaaxada & HIV-da - Wadajir Halis ah

TB-du waa maxay? "TB" waa magac la soo gaabiyay ee loo yaqaan cudurka qaaxada ama tiibishada. Marka uu qofka cudurka Qaaxada ku dhaco, ugana dhaco sambabada ama dhuunta oo uu qufaco, hadlo, qoslo ama hindhiso, jeermiga qaaxada ayuu hawada ku firdhiyaa. Qof walba oo u dhowna waxaa sambabada uga faafa jeermiga qaaxada ama tiibishada. Jeermiga qaaxada ama

tiibishada jirkaada ayuu ku noolaan karaa adiga oo aan la jiranin. Taasna waxaa loo yaqaan jeermiga qaaxada dhaliya. Difaaca jirkaada ayaa kaydiya jeermiga qaaxada, si uu u sugo caafimaadkaada. Marmarka qaarkood, jirkaada ma awoodo inuu iska difaaco geermiga qaaxada ama tiibishada. Haddii aad la jirato jeermigaas waxaa loo yaqaanaa cudura qaaxada ama tiibishada. Jeermiga wuxuu badi ku dhacaa sambabada. Sidoo kale waxuu ku dhici karaa kalyaha, maskaxda, lafta dhabarka, ama qaybaha kale ee jirka. Haduu cudurka qaaxada ama tiibishadu kugu dhaco, waxaad u baahantahay daaweyn. Waxaadna ku bogsoon kartaa daawen sax ah. Laakiin, hadaan lagu daaweyn waad u dhiman kartaa.

Maxay muhiim u tahay inaan ogaado inaan qabo jeermiga dhaliya cudurada qaaxada ama HIV-da? Jeermiga HIV-da wuxuu daciifiyaa (wiiqaa) difaaca jirkaada. Haddii aad qabto jeermiga Qaaxada ama HIV-da, **waxaad halis u tahay inaad u jirato cudura qaaxada ama tiibishada. War Farxad leh!** Waad ka hortegi kartaa geermiga TB-da intuusan isu badelin cudurka Qaaxada ama Tiibishada! Tilaabada ugu horeysa oo aad ku ogaan karto inaad qabto geermiga TB-da waa inaad ogaataa, haddii aad qaaday jeermiga TB-da. Taasna waxaad ku ogaan kartaa adoo jirkaada ka baara qaaxada ama tiibishada.

Waa maxay baaritaanka qaaxada ama tiibishada ee jirka? Baaritaanka TB-da ee jirkaada waxaa lagu sameeyaa gacanta. Labo ilaa saddex bari gudohood, ayuu daryeelaha caafimaadkaada fiirin doonaa gacantaada si uu u arko inuu dhacay fal kiimikaad. Soo barar "boosatiibo" ah macnaheedu waa inaad qabto geermiga TB-da.

Jeermiga HIV-da ma saamayn karaa natiijada baaritaanka TB-da ee jirka? Mararka qaarkood, haddii aad qabto jeermiga HIV-da iyo TB-da, laga yaabe in natiijada falgalka kiimikaad ee TB-da jirka ay lama hubaan "negatifo" noqoto. Taasna macnaheedu waa difaaca jirkaada oo aan si haboon u shaqaynayn. Daryeelahaaga caafimaadka ayaa kaala hadli doono hadaad halis u tahay geermiga TB-da ama cudurka Qaaxada. Laga yaabe inaad u baahato baaritaan kale oo caafimaad ama daaweyn.

Maxay tahay inaan sameeyo haddii aan qabo geermiska dhaliya labada cudur ee HIV-da iyo Qaaxada? Waxaa shardi ah inaad baaritaan is dabajoog ah samayso. Taasoo ay ka mid yihiin raajada xabadka iyo baaritaano kale. Haddii baaritaanadaas ay cadeeyaan inaad qabto cudurka qaaxada ama tiibishada, daryeelaha caafimaadkaada ayaa ku siin doono daawooyinka lagu daaweeyo qaaxadaada ama tiibishadaada. Haday baaritaanadaadu cadeeyaan inaad qabto jeermiska qaaxada ama tiibishada dhaliya, laga yaabee daryeelaha caafimaadkaada inuu ku siiyo daawooyinka dila **jeermiska qaaxada** si uusan cudurka isugu badalin **Qaaxo ama Tiibijo**.

Maxaan u baahnahay inaan ka ogaado daawooyinkayga? Daryeelaha caafimaadkaada ayaa kuu sheegi doono sida loo qaato daawooyinkaada iyo dhibaatooyinka ay keenaan.

Sideen ku bartaa in ka badan? Waxa aad weydiisa dhakhtarkaaga ama kal-kaaliye. Weeydii takhtarkaaga ama kaaliyaha. Waxa aad wacda waaxda caafimaadka xaafadaada ama waaxda caafimaadka gobolka.

Qaaxada ka ilaali naftaada, qoyskaada iyo saaxiibadaa. Dhamayso daawaynta Qaaxada!

Text - Virginia Department of Health Division of TB Control www.vdh.virginia.gov/epi/tb
November 8, 2002 Software by Healthway Software ©2002
This work is licensed under the Creative Commons Attribution-NonCommercial-NoDerivs License
<http://creativecommons.org/licenses/by-nc-nd/2.5/>

A Healthy Roads Media project
www.healthyroadsmedia.org

Funded by the National Library of Medicine under contract N01-LM-1-3513
from the Greater Midwest Region of the National Network of Libraries of Medicine.

TB and HIV - Somali (Last Reviewed 1/06)